

Mohamed Ali Yalahow

2019



# ISKU FILNAASHO

BARO SIDII AAD KU GAARI LAHAYD  
ISKU FILNAASHO NOLOLEED & MID  
DHAQAALE INTABA

**CUTUBYADA UU KA KOOBAN YAHAY BUUGA:**

HORUDHAC.....	III
BADAL HAB FIKIRKAAGA.....	1
MAAREE WAQTIGAAGA.....	8
BADAL SAAXIBADAADA.....	13
GARO AWOODAHAAGA OO KU KALSOONOW NAFTAADA.....	16
MA TAHAY HAL-ABUURE GANACSI? .....	21
SHIIL MASKAXDAADA OO CURI FIKIR GANACSI OO AAD ADIGU LEEDAHAY.....	24
MAALGELI GANACSIGAAGA .....	29
ABUURO SHAQO MUSHAARI AH .....	34
GUNAANAD .....	40

## Horudhac

Mahad idilkeed waxay u sugnaatay allahii na abuuray, naga mid dhigay adoomihiisa muslimka ah, wax akhriya waxna qora, intey nool yihina tacliinta aanan ka tagin.

Waxaan sidoo kale u mahad celinaya dhammaan aqoonyahankii, ardaydii, waalidkii, iyo asxaabtii igu dhiiri geliyay, garab hiil iyo hoona ila taagnaa intii aan waday qoridda buugan aan ugu magac daray ISKU-FILNAASHO.

Buugan oo ah buuggii labaad ee aan afka soomaaliga ah ku qoro ayaa waxaa igu dhaliyay arimo ay ka mid yihin:

- Shaqa la'aanta baahsan ee ka jirta guud ahaan dalka.
- Niyad jabka haya ardaydii muddo sanado ah waxbarasho soo waday markii ay qalin jabiyeena shaqo la'aantu soo wajahday.
- Caawinaad la'aanta dadka xoogaa dhaqaalahaa ah haysta iyo sida ay uga jiifaan wax badan oo ay qaban kareen.
- Dalka oo lahayn goobo si gaar ah u tababara una soo saara hal-abuurayaal isku filan oo ganacsiyo kala duduwan abuura dhalinyara badan shaqaaleysiya.

Hadaba waxaan ugu baaqayaa dhamaan ardayda hada wada waxbarashadii iyo kuwa horey usoo qalin jabiyyabta in ay ka faa'iideystaan buuggan, gaarsiiyaanna cid walba uu u noqon karo caawimaad waxna ka faa'iidi karta.

Ugu dambeyna waxaan ka afeefanayaa in aan la ii qaban qaladaadka iga dhici kara dhan daabacaad, qoraal, iyo nuxur ka hadalka oo soo koobneen intaba oo aan sabab uga dhigayo, cuseebka aan ku cusbahay wax ku qoridda afka soomaaliga.

## Badal hab fikirkaaga

Dunidan aynu joogno waxaa ku nool 7.6 billion dad ah, dhamaantoodna waxa ay har iyo habeen ugu jiraan mid is og iyo mid aan is ogeynba la dagaalanka nolol maalmeedka iyo qof walba sidii uu qeybta ugu badan uguna wanaagsan u hanan lahaa.

Ayada oo ay sidaa tahay ayaa hadana lagu kala dheereeyay xaqijintaa yoolalkaas dadku ay ka leeyihii nolosha, oo ay qolo u noqdeen kuwa horumary oo nolol aduunyo wax la yaqaanay oo horumar ah ka sameeyeen, kuwana ay wali gaajo, amaan daro iyo jahli ay gacantooda ku sababeen la daalaa dhacayaan.

Hadaba hadii aan nahay afrikaan waxaan ka nahay dadka dunida ku nool 1.2 billion, hadana badankeen waxaan ku nool nahay nolol aad u hooseeysa, oo kuwuu ilaahey siiyayna in ay bulshadii dib ugu soo celiyaan way ku adagtahay in yar mooyee, kuwii aanan haysana in ay is badal la taaban karo sameeyaan iska daayee badankood xataa kuma fikiraan.

Somaaliya oo ah wadan ka mid ah wadamada dunida ku yaala isla markaana ah wadan dhaca qaaradda afrika oo ay ku nool yihiiin 14.7 million oo qof ayaa waxa uu la qeybsadaa dunida qeyba badan oo ka

mid ah khayraad fara badan oo uu ilaahay ku manaystay, oo iskugu jira xoolo, bad iyo bari ay macaadinta iyo shidaalku ka buuxo, hadana badankeen waxaan qeyb ka nahay dadka ugu nasiibka xun dunidan oo in ay ka faa'ideystaan barwaaqada uu ilaahay siiyay iska daayee badankood ay gaaja ugu dhimanayaan ceelal shidaal iyo macaadin qaali ah dushooda.

In aan dhibaatadaas iyo dib u dhacaas ku noolaano macnaheeda maahan in aan xaq u leenahay oo dunida qeybta aan ka leenahay inta aynu nool nahay intaa tahay ee waa natija ka dhalatay falal aad u fool xumaa oo iskugu jira xaq bani adam iyo mid alle oo aan horey u galnay, badankeena ay ka soo laaban waayeen, ciqaabta ku dhacaysa kuweenii xumaaday ee dunuunbta iyo xuquuqda galay darteedna waxaa ay dhibaatadu gaaraysaa masaakiin aanan waxba galabsan oo xaq alle iyo mid bani aadanba ku jirin.

Mar hadii aan isla garanay oo maskaxdeenu ay ka dhaadhacday in dhibaatada iyo dib u dhaca nololeed aynu ku jirno ay tahay ciqaab ka dhalatay dunuub waa in aynu rabbi u laabanaa oo an cafis iyo towba waydiisanaa, saxnaana waxa hada ka dambeeya in aan ku dadaalno dhowrsanaan iyo rabbi raali gelintiisa.

Hadaba markii aan usoo laabano mawduuca cutubkan oo ah badal hab fikirkaaga, waxaa ugu horeeya ee qof horumar gaaray oo ku dhaqaaqay guushiisana qeyb libaaxle ka qaadatay waa badalidda hab fikirka.

Hadii ay maskaxdaadu ka dhaadhacsan tahay waxba ma qaban kartid, waxaad tahay afrikaan waliba soomaali kasii ah, dunida wax badan ka dambeeyaa, dhaqaale fiican haysanin, dadkiisu ay isdilayaan kuwana is dhacayaan, waxaa hubaal ah in ay kuu rumoobeyso waxaas oo dhan oo aad helaysid ama la kulmeysid waxa ay mar walbo maskaxdaada isku sheegto ama ku fikirto.

Hadaba si uusan dib u dhaca hada na gaaray mid kale kuugu darsamin waa in aad badashaa hab fikirkaaga, oo kaliya ay noqdaan waxa aad ka fikiraysid ama aad rabigaaga ka rajaynaysid wax wanaagsan iyo horumar, waxaa hubaal ah kaliya hab fikirkaaga oo aad saxdaa in ay wax badan kuu saxmi doonaan, oo aad guulaha aad gaari doonto ay midba mid kuusii dhiibto haddii uu rabbi idmo.

Dad badan oo horey guulo aad u waaweyn ka gaaray nolosha waxa ay dhamaan isku raacsanaayeen in ay waxa ugu horeeya oo ay guusha ka bilaabato tahay fikirka iyo waxa aad awoodaahaga iyo nolosha kugu hareereysan aad ka aaminsan tahay, waxayna sidoo kale xaqijiyeen in markii ugu horeysay oo ay badaleen hab fikirkooda kaliya ay badalantay

qaabkii ay u arkayeen nolosha, iyo caqabadaha la socda oo ay maalin walbo ku soo wajiji jirtay nolosha.

Waxay sidoo kale dhamaantood isku raaceen in ay markii ugu horeysay caqabadihi nolosha oo ay u arki jireen dhibaato weyn oo ku dhacday iyo dib u dhac ka reebay jiilkoodii ay isku badashay fursado usii dhaweynaya yoolkoodii nolosha ay ka lahaayeen oo ay khibrad iyo waaya aragnimo ka helaan.

Hadaba aqriste noloshaada qiimeey caqabadaha nolosha ma waxaad u aragtaa dib u dhac iyo dhibaata weyn oo ku soo wajahday, mise waxaad u aragtaa fursad iyo waaya aragnimo kuu soo hormartay, qiimeey naftaada oo badal hab fikirkaaga si aad ugu biirtid dadkii guuleystay oo caqabadaha soo wajahay fursado u badalay.

Waxaan halkan kugula wadaagaa sheeko gaaban oo ku dhacday haweeney wax badan lasoo xigto marka laga hadlayo saameynta fikirka qaldan oo aad naftaada iyo bulshada kugu hareereysan kaa aaminto uu leeyahay.

Waxay ku bilaabanaysaa Sheekada sidan:

Waxaa jiri jirtay haweeney haysatay laba caruur ah oo uu aabahood furay, dhaqaala fiican oo ay ku noolaatana aanan haysanin, bulshadii

ay ku dhix nooleedna dhib iyo takoor iyo niyad jabin maahane wax kale aysan ku haysan, caruurteediina ay u jeedaan nolosha adag oo ay ku jiraan oo aysan haysan cid wax u qabanaysa.

Markii ay in muddo ah ku jireen noloshaa waxay maamadii iyo caruurtiiba aamineen in ay tahay sidan nolosha ayaga u qorneed in ay ku noolaadaan inta ay dunidan joogaan, oo aysan mudneen nolol ka fiican isla markaana aysan la jaan qaadi Karin waxna la wadagi Karin dadka kale ee noloshoodu dhaanto tooda.

Maxaa yeelay waxa caado u noqotay in la takoro oo la yiraahdo waxba ma tiihiin, mana qabsan kartaan waxa ficiin qabsaday iyo xaq uma lihidin nolol raaxa leh in aad ku noolaataan.

Korimadii ilmaha iyo hab fikirkii hooyada intaba waxaa badalay dabeecadii iyo dhaqankii ay kala kulmeen dadkii deegaankooda waxayna aamineen in ay tahay wax sax ah inta ay bulshadu ka aaminsan tahay maxaa yeelay haddii aysan xaqiiqo ahayn wax baa is badali lahaa oo nolol tan dhaanta ayaan ku noolaan lahayn ayay maskaxdoodii ku fikirtay aamintayna.

Muddo kadib maalin maalmaha ka mid ah maamadii oo gaari saran oo u socota magaalada si ay ugasoo adeegato ayaa waxa ay gashay shil

gaarsiiyay dhibaato aad u balaaran, isla markiiba waxaa loola cararay isbitaalka oo lagula tacaalay, caruurteedii iyo ehelkii kalana isbitaalka ayay ugu yimaadeen.

Maalmo ayay koomo ku jirtay oo ay ogaal lahayn maxaa yeelay jugta ugu culus waxay kaga dhacday madaxa oo waxaa gaaray dhibaato dhanka maskaxda ah.

Maalin maalmaha kamid ah ayay soo naaxday dhaqtarkii iyo caruurtii iyo dhamaan ehelkii wixii meesha joogay waalagu wada farxay laakiin maamadii dadkan faraxsan ee u marxabeeynaya kuwana ay ku dul oynayaan hal qofna kama garan wayna la yaaban tahay dadkan dul dhooban iyo waxa ay yihiin.

Dhaqtarkii ayaa dareemay xaalkeeda oo su'aala badan waydiiyay kadibna waxa uu u sheegay in ay dadkan caruurteedii iyo waalidiinteed ay yihiin ayaduna ay shil gaari gashay oo ay muddo ogaal la'aan ahayd jugta madaxa ka gaartay darteedna ay dhumisay xasuusteедii.

Farxadii waxay isku badashay murugo kale maxaa yeelay hooyadaa oo aan ogayn qofka aad tahay waa wax laga murugoodo, waxaasa nafta lagu sasabay in ay ka sii darnaan lahayd in ay geeriyooto ama ay kasoo laaban weyso ogaal la'aanta, muddo kadibna waxaa la geeyay

xaafadeedii oo muddo lagu daweeynayay kadibna way ka kacday oo ay cafimaaday.

Si ay wax badan uga ogaaato dhibka gaaray ayay waxay bilowday in ay waxbadan oo ku saabsan cudurada maskaxda iyo dhimirka ku dhaca in ay akhriso, baaritaan dheerna ku samayso cudurka ayada ku dhacay iyo daawadiisa, kadibna waxay ka qortay maqaal aad u dheer aadna u faahfahiyay cudurkaas iyo dhibkiisa iyo waliba sida loo daweyn karo.

Dhaqaatiirtii iyo dadkii baranayay cilmiga caafimaadka gaar ahaan cudurada ku dhaca maskaxda ayaa waxay aad uga heleen maqaalkeedii waxayna ku casuumeen in ay kala soo qeyb gasho shirarka iyo doodaha cilmi baaris ee cudurada maskaxda quseeya.

Muddo kooban ayay waxay ku noqotay qof caan ah oo dadku ay wada jecel yihiin loogana yimaado meela fogfog la kulankeeda iyo wax ka faa'iideysigeeda.

Waxay u noqotay dhiiri gelin iyo in ay fikirka ay nafsadeeda ka aaminsan tahay uu noqday mid meel sare geeynaya oo sii dhiiri gelinaya dhibkii ku dhacayna dartiis uu maskaxdeeda ka tirtirmay fikirkii liidnaanta iyo qalbi jabka ku dhisnaa oo ay nafteeda iyo dadkeeduba ka aaminsanaayeen.

## MAAREE WAQTIGAAGA

Waxaan ognahay in maalinti ay ka kooban tahay 24 saacadood oo kaliya. Waqtigu waa wax dhamaad leh, adiga ayeyna ku jirtaa hadba sida aad uga faa'ideysan laheyd.

Hadii aad lumisid lacag waxaa laga yaabaa iney kusoo marto fursad aad dib ugu heli kartid lacagtii kaa luntay, laakin lama soo celin karo saacad khasaartay. In kastoo aanan saacad kusoo siyaadin karin maalinta, cutubkaan wuxuu kaa caawinayaan sida aad faham buuxa uga yeelan laheyd muhiimadda ay leedahay in aad maareyso waqtiga iyo sida maareynta waqtiga ay kaaga caawin karto helidda waqtii dheeraad ah oo aad waxyaaba kale ku qabsato. Maareynta waqtiga waxaa ka faa'ideysan kara qof walba.

### Muhiimadda Maareynta Waqtiga

Muhiimada waqtiga iyo maareyntiisa waxey isugu soo shubaneysaa hadba sida uu waqtiga khaas ahaan ama xirfad ahaan u saameeyo noloshaada. Maareynta waqtiga waa habeynta maalintaada aad ku sameysid si aad sida ugu fiican ugu isticmaashid daqiiqad walbo. Maareyn waqtii oo heer sare ah waxey kuu ogolaaneysaa sida aad isugu dheeli tiri laheyd shaqadaada iyo nolosha gurigaaga. Natijjada ka

dhalata waqtii aan la maareynin waxaa ka mid ah inaad marwalbo dhaafsto waqtiga kama dambeynta ah ee loogu talo galay inaad wax ku qabato iyo inaad la noolaato walwal dheeri ah.

Hadii aad horay ugu fashilantay maareynta waqtigaaga weli waxaad haysataa waqtii aad wax ku qabsato, sameyso waqtii kama dambeys ah ee aad ku qabato shaqooyinka, baro sida shaqooyinka qaar dad loogu wakiishado, kala garo shaqooyinka leh mudnaanta koowaad si aad waqtigaaga ugu bixisid waxa kuugu qiimaha badan.

**Waa maxay sababta ay kuu anfaceyso inaad maareyso waqtigaaga?**

Mar hadii aad taqaanid sida loo maareeyo waqtiga waxaad dareemeysaa faa'idooyin badan oo kaaga imaanaya maareynta waqtiga, waxaana kamid ah faa'idooyinkaas:

- **Inaad ku qabato hawl badan waqtii kooban**

Hadii aad leedahay xirafad waqtii maareyn ah waxaad awood u yeelaneysaa inaad waqtii yar ku sameysid hawlo badan adoon ku bixin juhdi badan. Inaad hawsha kuugu mudnaanta badan waqtii siisidna waxey fure u tahay qabashada arrimo badan. Hadii aad heshid hal saac

oo dheeri ah oo aad ku qaban karto hawl wax soo saar kuu leh waxaad heleysaa 312 saacadood oo wax soo saar leh sanadki.

- **Shaqo dhameystiran iyo nolol micna wayn kuu leh**

Wax ka niyad jab badan malahan hadii aad maalinti oo dhan tahay qof mashquulsan hadana aadan aheyn qof wax soo saar leh. Dareenka laga helo hawsha dhameystiran waxey dhiira gelin kuu sii siineysaa shaqada. Marka aad guriga joogtidna waxey kuu fududeyneysaa inaad nasato ood ku raaxeysato waqtigaaga. Hadii aad si hoose ula socotid sida aad waqtigaaga u isticmaashid waxaad heleysaa waqtii aad ku qabato waxyaabaha ay naftaada jeceshahay.

- **Go'aan qaadasho la'aantaada oo yaraata**

Walwalka aad ka walwalshid inaad dooratay doorasho wanaagsan iyo in kale ayaa ah arin waqtii badan cunta, waa dabiici in go'aannada waa weyn ay qaataan waqtii, laakin go'aannada yar yar aad qaadato maalin walbo ayaa sidoo kale kaa cuni kara waqtii badan, garashada waxa aad rabtid inaad sameysid waxey kuu badbaadin kartaa waqtii badan. Inti aad maalin walbo waqtii badan ku dheygagi laheyd hawsha kuu taala iyo waxa aad qaban laheyd isku day inaad qorsho joogta ah sameysatid maalin walbo.

- **Inaad si dhaqsa ah ku gaartid hammigaaga**

Dad badan ayaa leh hisgi iyo hammi wayn, hasa yeeshee faham la'aanta muhiimadda ay leedahay in waqtiga lamaareeyo ayaa ka hortaagan gaaridda hammigooda.

Tusaale, dabcan hammigaaga waxaa kamid ah inaad bilowdid nolol wanaag, laakin waxaadan heli karin waqtii aad ku aadid jiimka, waxaa suurta gal ah in waqtiga aad u baahan tahay aad haysid laakin aadan arki karin, waxa kaliya aad u baahantahay waa inaad waqtigaas heshid si aad u gaartid hammigaaga.

- **Kalsoonidaada oo kor ukacda**

Maareynta waqtiga waa arin kor u qaadi karta kalsoonidaada, waxaad awood u heleysaa inaad naftaada siiso daryeel, hadii aad is daryeeshid waxaad dareemeyso ama u ekaaneysa qof ay nolosha isugu duba dhacsan tahay. Wuxaan si joogta ah u heleysaa wax kiciya kalsoonidaada mar walba oo aad dareentid inaad hawl soo afjartay.

- **Waqtii badan oo kuu soo hara si aad u sameysid waxyaabaha aad jeceshahay**

Hadii aad ka fakartid waqtiga ay kugu qaadato inaad seexato, shaqeyso, cunteyso, socota iyo isnadiifiso, waxaa kuusoo haraya 4

saacadood maalin walba oo aad ku qaban kartid waxyaabaha aad jeceshahay. Barashada maareynta waqtigaaga waxey kuu sahleysaa inaad hesho fursado badan oo aad uga shaqeyn karto kobacaaga shaqsi ahaaneed, iyo inaad waqtii laqaadato qoyskaaga iyo asxaabtaada.

- **Hoos udhigidda walwalka iyo in shaqada ay kaa tan badan tahay**

Waxaa laga yaabaa in maalinti ay kusugayaan mashruuc, inaad cunugaaga geyso isbitaal ama dugsi, inaad shir la qaadato dad, inaad usoo adeegto gurigaaga. Marka hawlaha ku sugaayo haddii si isla eg ay muhiim kugu wada yihin waxaad dareemeysaa in howsha ay kaa tan badan tahay. Maareynta watiga wuxuu kaa caawinayaa sida aad u eegi laheed hawlaha ku sugaayo oo u kala sooci laheyd iyo inaad mudnaanta siisid hawlaha lagaaga fadhiyo, waxaad durbadiba arki kartaa hawsha la xiriirta shaqada iyo tan la xiriirta naftaada, waxaad sidoo kale garan kartaa sida hawlaha qaar loogu sameeyo wakil.

## BADAL SAAXIBADAADA

Saaxiibka waa qofka kaliya ee saameynta ugu dhaw ku yeesha noloshaada iyo hab fikirkeeda, waxa dhacda in uu qeyb ka noqdo go'aamada noloshaada saameynta ku leh, hadaba cutubkaan oo halku dhigiisa yahay badal saaxibadaada ayaan waxaan uga hadli doonaa dhibaatada uu kuu horseedi karo saaxiib ka xun ama aan jecleen horumarka iyo isbadalka, sidoo kale waxaan tala iyo tusaalooyin fiican kaa siin doonaa saaxiibka wanaagsan ee qeybta ka noqon kara horumarka iyo xaqijinta yoolalka nololeed ee kuu dagsan.

Hadii aan ku hormarno hadal aad u qiima badan oo ay aqoon yahano badan oo wax ka qoray guusha iyo is badalka shaqsiyadeed ay adeegsadan oo dhahaya “saaxiibkaaga itus, mustaqbalkaaga aan ku tusee”, oo macnaheedu yahay hadii aad rabtid in aad ogaatid noloshadaada iyo mustaqbalkaaga halka uu ku dambeyn doono waxad fiirisaa nooca saaxiib ee aad hada saaxibka la tahay.

Hadii saaxiibada aad leedahay oo aad waqtiga ugu badan la qaadatid ay yihiin kuwa ku mashquulsan adigana kugu mashquuliya wax aan horumar usoo kordhinaynin noloshiina, hadii ay yihiin kuwa hab fikirkoodu uu gaaban yahay oo aan hamisare ka lahayn nolosha, kuwa si fudud iskugu dhiba caqabadaha yar yar ee nolosha iyo kuwa adadag

ee u baahan iscaawinaad iyo isku caqli celin in looga gudbo, waxaad u baahan tahay si aad horumar u gaarto kobac dhaqaale iyo mid nololeedna aad u xaqijiso in aad badashid saaxiibadaas oo aad u guurtaa saaxiibo kugu caawiya gaarida yoolkaaga.

Saaxiibka wanaagsan ee ay tahay in aad waqtii ku bixisid raadintiisa iyo la saaxiibkiisa waa midka asagana noloshiisa horumariya taadana qeyb ka qaata horumarkeeda, waa saaxiibka xilliga dhibaatada kula raadiya xalka ug macquulsan ee looga gudbi karo dhibkaas isla markaana kula qeybsada xanuunka wixii uu hayana hiil iyo hoo kula garab istaaga.

Saaxiibka wanaagsan ee ay tahay in aad qeyb ka mid ah noloshaada iyo guulahaaga ka dhigto waa saaxiibka fikirka saliimka ah leh, hamiga sare leh, waqtigiisa wax dan u ah horumarka aad tiigsanaysaan maahane wax kale aan ku dhumin.

Saaxiibka wanaagsan oo ay dadkii horey nolosha guulaha uga gaaray ay waqtigooda la qaadan jireen waxa uu ahaa mid markii ay ka sheekeynayaan horumarkooda iyo guulihii ay gaareen ku lahaa kaalin buuxda la'aantiisna ay dadkaas qaar gaareen natijada ay ka gaareen yoolalkoodii.

Waxaa la sheegaa in ninka dunida ug qanisan ee la yiraahdo Bill Gate uusan lahayn saaxiib uu waqtigiisa firaaqada la qaato oo aan ka ahayn xaaskiisa Malinda gate, sidoo kale dadkii dunidan guusha uga tagay waxaa ka mid ahaa gudoomiyihii shirkada apple steiph jobs asagana waxaa la sheegaa in uusan lahayd saaxiibo garab taagan oo waqt badan la qaata sida aan anaga maanta nahay oo kale, raadkii uu reebayna ilaa hada waa laga sheekeeyaa.

Hadaba aqriste is qiimeey adiga oo fiiri saaxiibada waqtigaaga inta ugu badan kula qaata, ma kuwa kula dhisaya hamiga iyo yoolka aad ka leedahay noloshaa, ma kuwa waqtigooda iyo kaagaba ku dhumiyo waxyaaba aan aduun iyo aakhiraba wax idiin tareyn baa, ma kuwa aanba lahayn hami iyo yoolal ay higsanayaanbaa mise waa kuwo niyad jabka iyo dib u dhaca aad in badan ku jirtid isla markaana aad aaminsatahay in ay facaa kaa reebeen qeyb ka ah baa.

Jawaabaha sua'aalahaas kaaga soo baxa ku qaado go'aan oo ama hayso saaxiibka wanaagsan ama iska badal saaxiibka dib u dhaca iyo guuldarada, adiga oo ka xasideynin waanada iyo talada laga yaabaa in uu dartaa isku badalo oo uu saaxiib wanaagsan kuu noqdaaye.

## GARO AWOODAHAAGA OO KU KALSOONOW NAFTAADA

Allahii na abuuray waxa uu na siiyay awoodo isugu jira kuwa muuqda iyo kuwa qarsoon intaba, waxa uuna eegayaa qof walbo sidii uu uga faa'iideysto waxa la siiyay, sidaas oo ay tahay ayaa dad badan oo naga mid ah waxa aysan dareensaneen awoodaha uu alle ku manaystay kamana faa'ideystaan.

Wixii lagu siiyaa hadii aadan ka faa'ideysan waa lagaala noqonayaa, hadaba sida saxda ah waa in uu qof walbo ka faa'ideystaa awoodaha uu rabbi siiyay, umaddana uga faa'ideyaa.

Aqriste ma ogtahay in aad leedahay awoodo badan oo dadka kale ka mid ah aysan lahayn, ma ogtahay in aad hadii aad garatid awoodahaaga oo aad u dhaqaaqidid ka mira dhalintooda aad isbadal aad u weyn oo horumar iyo guulo ah xaqijin kartid, ma og tahay in hadii aad awoodahaaga isticmaashid aad is badal aad u balaaran samayn kartid mise ogtahay in isku kalsoonaan la'aanta ay sababto in aad garan waysid awoodahaaga.

Kalsoonida nafta waa shay qaali ah, waana mida kaliya ee qofka u horseedi karta in uu tijaabiyo nolosha qeybaheeda kala duduwan, waqtii

koobana ku gaarsiisa qofka garashada naftiisa halka ay ku fiican tahay iyo halka ay ku liidato.

Hadii aad kalsooni buuxda oo nafsadeed heshid waxaad noqonaysaa geesi ku dhiirada caqabadaha nolosha isla markaana si kalsooni iyo geesinimo leh dhex mushaaxa oo caqabadihii u badala fursado.

Aqriste ku kalsoonow naftaada oo u istaag sidii aad ku wajihii lahayd nolosha, oo ka faa'ideyso awoodaha uu ilaahay kugu manaystay.

Hadaba waxaan halkan kugula wadaagaa sheeko gaaban oo ku dhacday nin ganacsade ahaa oo wax badan lasoo xigto marka laga hadlayo awoodaha uu qofka leeyahay markii uu garto isla markana uu naftiisa ku kalsoonaado.

Waxayna ku bilaabanaysaa sheekada sidan:

Waxaa jiray nin ganacsada ahaa oo lahaa shirkad yar oo muddo uu la rafanayay kobcinteeda iyo horumarinteeda, dhaqaala fiicana ma uusan haysan ee waxa uu ku waday ganacsigiisa dayn uu ka soo kala qaado ganacsatadii kale ee uu ka adeeganayay iyo dadkii uu ka daganaa guryaha.

Muddo markii uu sidaa ku jiray oo ay dayntii ku badatay oo uu la yaaban yahay sidii uu wax yeeli lahaa ayaa waxa uu maalin maalmaha ka mid

ah soo fadhiistay meel jardiin ah isla markaana galay fikir dheer iyo is lahadal sidii uu wax yeeli lahaa.

Markii uu in cabaar ah fadhiiyay ayaa waxa ku soo maray meeshii nin oday ahaa oo ku yiri waxan u jeedaa in ad ku wareersan tahay sidii ad ka yeeli lahayd caqabadaha ku haysta iyo sidii aad ku xalin lahayd daymahan faraha badan ee lagugu leeyahay.

Ninkii ganacsadaha ahaa asaga oo la yaaban ninkan uusan aqoon oo hadana fahmay dhibkiisa ayaa ku yiri haa si aan wax yeelo ayaan garan la'ahay, markaasuu ninkii odayga ahaa talo iyo tusaalooyin uu kaga gudbi karo dhibkan uu maanta ku jiro u sheegay isla markaana inta jeebka kasoo baxshay jeeg ay ku qoran tahay lacag dhan nus milyuun dollar ayuu u dhiibay waxa uuna ku yiri hal sano kadib maanta oo kale iyo goobtaan iigu keen lacagteyda wan ku daymiyayee, wuuna ka dhaqaaqay.

Farxad iyo naxdin isku darsan kadib markii uu fiiriyay magaca ku saxiixan jeega ay ku qoran tahay lacagtan aadka u faraha badan waxa uu noqday nin can ahaa oo ka tirsanaa dadka dunida xilgaa ugu lacagta badnaa, waxa uu halkaas kasii qaaday cabsi iyo farxad kale oo isku darsan.

Waxa uu is weydiiyay ninkii ganacsadaha ahaa sidee ku dhici kartaa in uu igu aamino lacag intaa la eg waliba asaga oo aan I garanaynin, iyo maanta ma waxan talo iyo lacag ka helay ninkii dunida ugu lacagta badnaa ee aan ku riyoon jiray in aan gaaro halkuu gaaray iyo hadalo kale oo badan.

Ninkii waxa uu go'aansaday fikir dheer kadib in uusan ku ceeboobin ninkaas odayga ah ee aaminay, lacagtaasna aysan ku dhumin ee uu meel xafidan galiyo jeega, kadibna uu bilaabo sidii uu xal kale ugu heli lahaa dhibkiisa bari markii uu la kulmana uu uga farxin lahaa sidii uu lacagiisii ugu soo celiyay ayada oo sideedii ah asagana uu u xaqiijiay guulo fara badan ganacsigiisiina uu horumar gaarsiiyay.

Dhiirigelin hor leh iyo masuuliyad ayuu ka qaaday arintaas waxa uuna bilaabay in uu maalinba keeno hal'abuur cusub iyo qaabab uu ku hormarin karo ganacsigiisa, muddo ayuuna waday waxa uuna ku guulaystay in uu xaqiijiyo ahdaaf badan oo u dagsanayd, daymihiina dhamaantood wuu iska dhiibay oo waliba hanti fiican ay usoo hartay.

Sanad ayaa soo wareegay maanta waa maalinkii uu labalansanaa ninkii uu waligiis ku riyoon jiray in uu noqdo asaga oo kale, sidoo kale waa maalinkii uu soo bandhigi lahaa guulihii uu gaaray muddadii

sanadka ahayd oo ay kala maqnaayeen iyo waliba in uusan lacagtii wali isticmaalin oo uu hayo jeegii oo sidiisii ah.

Xilligii balanta ayaa la gaaray halkii uu sanad ka hor fadhiyay ayuu fadhiistay wax yar kadib waxaa u yimid ninkii asaga ahaa, salaan iyo is marxabeen kadib intaan hadal kaleba lasii galin ayaa waxaa goobtii timid gabar kalkaaliso ah oo ku qeylinaysa kaalay waryaa maxaad u soo baxday kadibna gacanta ayay qabatay ninkii odayga ahaa waxayna ku tiri ninkii ganacsada ahaa iga raali ahow waa oday xanuunsan oo waxa uu ka soo fakatay isbitaalka dadka dhimirka looga jiro lagu xanaaneeyo, waxa uuna dadka ku dhibay been ah waxaan ahay ninkii hebel ahaa ee dunida ugu lacagta badnaa waxa uuna siiyaa dadka jeeg faalso ah oo aysan waxba ka jirin ee mar labaad naga raali noqo, kadibna way la dhaqaaqday oo ay la aday dhankii isbitaalka.

Ninkii gnacsadaha ahaa oo wareersan marna naxsan ayaa halkii kasoo kacay, asaga oo walwalsan ayuuna goobtiisii ganacsiga ku laabtay, waxa uuna xaqiiqsaday in dib udhaca iyo ciriiriga uu ku jiray ay kaliya ahayd wax maskaxdiisa ay iska dhaadhicisay ee uu ilaahay siiyay awooddii uu ku xaliyay dhibatadii haysay.

## MA TAHAY HAL-ABUURRE GANACSI?

Hal-Abuuraha Ganacsi ee guuleysta wuxuu leeyahay awood adag oo ka caawisa isaga/iyada inay guuleystaan. Aynu eegno tayada taasoo kaa dhigeysa Hal-abuure ganacsi oo guuleysta.

Hal-abuuraha Ganacsi waa in uu ku faraxsan yahay rajada shaqada. Waa inay mar walba yeeshaan wadid/kaxeyn xoog leh si ay u guulaystaan oo ay uga adkaadaan caqabadaha. Waa in aysan aheyn ujeedooyinkooda waaweyn kaliya naftooda laakiin sidoo kale waa iney arkaan in ay dhab ahaantii ka go'an tahay inay gaaraan iyaga oo aan eegin dib-u-dhaca badan oo ay la kulmaan.

Hal-Abuuraha Ganacsi ee guuleysta wuxuu markasta leeyahay dareen xoog leh oo isku kalsooni nafeed ah iyo fikrad bad qabta oo ku saabsan xirfadahooda iyo awoodooda. Shakhxiyaddoodu waa mid qeexan xoogna leh. Mar walba waxay diiradda saaraan, oo xaqiqdii afka uun aysan ku koobin arimaha ubaahan gacanta iy in ficol la sameeyo. Tani waa waxa ka dhigaya iyaga inay ka duwanaadaan dadka kale.

Hal-Abuuraha Ganacsi waa in uu markasta fiiro gaar ah u yeeshaa wax soo saarka iyo fikradaha Cusub si uu u noqdo mid guuleysta. Waa inay

si joogto ah u furfuraan nafsadahooda ayna ka fekeraan siyaabaha  
wanaagsan oo ay u maareyn karaan ganacsigooda ayna u hagaajiyaa  
alaabaha              iyo              adeegyada              ay              bixiyaan.

Tayada kale ee muhiimka ah ee Hal-Abuuraha ganacsigiisa guuleysta waa inuu u furfurnaadaa la qabsashada isbeddelka. Waa in uusan aheyn mid madax adag macangagna ah marka ay timaado doorasho kale. Isbeddelku waa waxa kaliya ee joogtada ka dhiga ganacsiga, ma jiro qof faa'iido kasameen kara hab ganacsi laga tagay.

Waddada guusha waxay ku jirtaa sameynta horumarino, hadday tahay horumarinta fikradaha, adeegyada iyo tiknoolajiyada. Hal-Abuuraha Ganacsi waa in uu yeeshaa maskax furan si uu u barto waxyaabo cusub. Waa lagama maarmaan in la fahmo habka kaliya ee lagu sii ahaan karo kan u sareeya, taasoo ay tahay in la sii wado isbedelka iyo horumarka. Hal-Abuuraha Ganacsi waa inuu ka warqabaa adeegyada farsamooyin ee ugu dambeeyaa iyo tiknoolijiyada si loogu adeego macaamiisha si habboon.

Tartanku waa inuusan ka cabsan Hal-Abuuraha ganaci. Dhab ahaan, tartanka waa waxa Hal-abuuraha qanaci ka dhiqa mid ku quuleysta

kobociisa. Monopoly ama In Shirkad Qura maamusho qiimaha suuqa marna ma ahan wax fiican. Hal-Abuuraha Ganacsi waa inuu noqdaa mid aad u firfircoon noqdana mid dhiirragashan. Isaga ama iyadu waa inay had iyo jeer noqdaan kuwa horey usocda, Isla markaasna, heerarka rajadoodu ahaato kuwo aad u sareeyaa. Kaliya marka qofku dhiirragashan yahay ayuu si qurux badan u samayn karaa isbadallo iyo guulo taxane ah.

Aqbalida diidmada ama dhaleeceynta wax dhisaysa waxay kaa dhigi karaan inaad noqoto Hal-Abuur Ganacsi oo guuleysta kaasoo socon kara mudo dheer. in la xasuustaa in aqbalaadda cambaareynta ay tahay hab aad muhiim ugu ah wadada guusha. sababta oo ah qofka ayaa markaas ka warqabi doona cilladaha ganacsigiisa sidaas darteedna dib usaxaya cilladihiisa. Sidaas awgeed aqbalaadda cambaareynta dhab ahaantii waa hab fiican oo wax lagu hagaajin karo. Dabacsanaanta, khibrada lyo rabitaanka si loo hagaajiyo loona dhagaysto kuwa kale iyo go'aamada adag ee lagu gaarayo guulaha waa waxa Hal-Abuuraha ganacsi ka dhigaya mid guuleysta. intaana waa waxa aad u baahan tahay inaad maskaxda si fiican ugu hayso haddii aad rabto inaad noqoto mid nafsadiisa guul ka gaara Hal-abuurkiisa ganacsi.

## SHIIL MASKAXDAADA OO CURI FIKIR GANACSI OO AAD ADIGU LEEDAHAY

Dad badani waxay kacabanayaan dakhli yaraan ama la'aan, sababo badan oo ay ugu waynyihiin xirfad la'aan, aqoon la'aan iyo kaabayaasha iyo ilaha dhaqaale ee deegaanka ama waddanka ay joogaan oo aan si fiican looga faa'idaysan. Dadka aan shaqayn marka laga yimaaddo, xataa dadka dawladda, shirkadaha ama hay'adaha u shaqeeya laftooda ayaan mushaharka lasiiyaa ku fillayn, sidaa awgeed ayay dadbadani u jeclaystaan inay sameeyaan ilo dhaqaale oo ay kaheli karaan dakhli ay gaar u leeyihiin.

Haddaba; kahor inta aynaan u daadegin nuxurka cutuubka, waxan eegi doonaa faa'idooyinka iyo faa'ido darrada uu leeyahay inaad samayso ganaci aad gaar u leedahay.

### Faa'idooyinka:

- Ugu horrayn way fududahay inaad samaysato ganaci yar oo kuu gaara.
- Maamuliddiisa ayaan iyana ah mid sahlan.
- Dakhliga oo dhan adiga ayaan leh.

- Cashuur badan lagaama rabo.
- Dhibaatooyinka kaaga yimaadda way fududahay inaad xalliso.
- Haddii aad kamaarmi waydo inaad xidho, si fudud ayaad uga bixi kartaa.

### **Faa'ido darrada:**

- Maadaama uu yahay ganacsi kuu gaara, dhammaan daymaha ayaa korkaaga ah.
- Xirfadaha ayaa ah kuwo xaddidan (Maadaama aanay shaqaale kala du-duwan kuu joogin)
- Ilaha maal-gelinta ayaa xaddidan sidoo kale.

### **Sideed u helaysaa fikraddaada ganacsi?**

Kasoo qaad inaad go'aansatay inaad ganacsi aad gaar u leedahay aad abuurto, halkeed kabiliaabi? Maxaad ku bilaabi? Sideedse u bilaabi?, waa su'aalo ay muhiim tahay inaad iswaydiisid kolka aad bilaabaysid mashruucaaga. Waxad xasuusnaataa wax kasta marka labilaabayo inuu ku bilaabmo fikrad ama aragti kugu soo dhacday. Haddaba; si aad

wax ugaogaato meelaha iyo sida aad ku heli karto fikrad ganacsi, ila akhri qodobadan hoos ku qoran:

1. Ugu horrayn waxa lagama-maarmaan aha inaad adigu naftaada taqaannid oo aad aqoon fiican isu leedahay, waa inaad taqaannid hibooyinkaaga iyo waxa aad ku fiicantahay ee waliba jeceshahay qabashadooda markasta, sidaa awgeed ayaa laga yaaba waxa aad jeceshahay inuu noqdo aas-aaska mashruucaaga ganacsi oo guulaysta. Tusaale: Waxad jeceshahay waxyaabaha mac-macaanka ah, fur oo samayso shirkad yar oo soo saarta mac-maacanka. “Waxa aad jeceshahay u beddel ganacsi!”
2. Dhug u yeelo oo lasoco dhaq-dhaqaaqa iyo isbaddalada dhaqan dhaqaale ee bulshadaada, waxa hubaal ah inay kuu fududaan karto helidda fikrad ganacsi.
3. Bulshadeennu inta badan kolka ay ka fakaraayan abuuridda ganacsi, waxay ka fakaraan kaliya furashada ganacsi hore ujiray ama layaqaannay oo kale. Kafakar inaad wax cusub soo kordhisid, bal u fiirso; alaabooyinka iyo adeegyada suuqyada caalamiga ah yaalla, waxad arki kartaa adeeg aan 20 sano kahor la aqoon, balse maanta haysta suuqa ugu ballaaran. Maxaa keenay?, qof adiga oo kale ah ayaa u fakaray, oo u arkay in alaabtaasi ay anfici karto bulshada oo loo

baahanyahay, kaddibna wuu sameeyay, waanay guulaysatay. “Isku day inaad adeeg cusub soo kordhiso!”

4. Isku day inaad adeeg hore ama alaab hore oo la isticmaali jiray aad wax kusoo kordhiso, cuntooyinka, cabitaannada, dharka, agabka guryaha, agabka waxbarsahada iyo dhammaan adeegyada maalinlaha ah ee guri walba lagu isticmaalo ayaad wax kusoo kordhinkartaa. Tusaale ahaan: Shaaha si aynu wada naqaanno ayaa loo kariyaa, loo iibiyaa loona qaybiyaa, magaalada Hargaysa waxa yimi nin dhalinyara ah oo markiisii hore maraykanka deggenaa, wuxu hindisay hab cusub oo shaaha loo kariyo loona iibiyoo. Shaahii maqaaxiyaha lagu iibin jiray ee lala fadhiisan jiray, ayuu kusoo qaaday haan yar, kaddibna wuxu lawreegay suuqyada magaalada, qofka dalbada waxa loogu shubayaa koob hal mar uun la isticmaali karo, wuxuna ula baxay meheraddiisa shaaha wareega ee “Dhakka Jabiye”.

Sidoo kale maadaama ay soomaalidu aad u jeceshahay cunnidda oodkaca, laakiin karintiisa iyo jaridda hilibkiisa dad badan ma yaqaanaan, si ay baahidaas u daboosho ayay gabar dhalin yaro reer muqdisha ah waxay furtay ganacsi oodkaca oo karsan dal iyo dibad u suuqgeynaya, aadbaana loo soo dhaweeeyay. Adna sidaasoo kale ayaad adeeg hore oo jiray si kale u iibin kartaa.

5. Waxa laga yaabaa in fikrad ganacsi oo wanaagsani kugu soo dhacdo, balse aad u waydo suuqii ku habboonaa, ha niyad jabin, iskana jir inaad marwalba fikirkaaga ku koobto deegaankaaga ama magalaadaada oo kaliya, waayo gobolada kale ayaa laga yaab in aad loogaga baahanyahay, aadna kahesho suuqii ku habboonaa.
6. Ugaarso fursadaha, waxa dhici karta in suuqa markaliya si kusoo boodda ah ay fursado uga bannaanaadaan, iyadoo ay sabab u tahay alaab cusub oo suuqa kusoo korortay. Tusaale: Bulshadaada ayaa waxay baratay cunto aanay hore u aqoon, hase ahaatee u timaadda iyada oon diyaarsanayn, waxana diyaarin kara oo kaliya dad yar, fur suuq lagu gado iyada oo diyaarsan.

## MAALGELI GANACSIGAAGA

Kadib curinta fikir ganacsi waxaa laga maarmaan ah in loo helo maalgelin iyo dhaqaale lagu socodsiiyo ganacsigaas cusub, waxana jira dhowr qaab oo loo helo maalgelinta, cutubkaan oo cinwaankiisu yahay Maalgelin Ganacsi ayaan ku faahfaahin doonaa.

Ugu horeyn markii uu qofka hal-abuuraha ah uu curinayo fikir ganacsi oo uu asaga leeyahay waxa dhici karta in uu haysto dhaqaale uu ku dhiso kuna horumariyo ganacsigiisa, sidaas dateed uma baahna maalgelin kale oo uu ku bilaabo ganacsigiisa oo iskiis ayuu isku maalgelinaya.

Marka xigta haddii uusan haysan wax dhaqaale ah waxaa sida ugu wanaagsan ganacsigiisana dan u ah ay noqonaysaa in uu qof qoyskiisa ka mid ah sida waalidkiis, walaalo ama xaas amaba saaxiib uu u bandhigo fikirka ganacsi ee uu rabo in uu bilaabo, sharaxaad dheerna ka siiyo qorshaha ganacsigaas uga dagsan, isla markaana u cadeeyaa qeyb intee la eg ayuu ogol yahay in lala wadaago milkiyadda ganacsigiisa maadaama la maalgelinayo.

Marka seddexaad waa in uu fikirkiisa inta diyaarsado dhinac walbo ka fikiro qoraal ku cadeeyo waxa uu ganacsigiisu yahay, halka uu ka

shaqeeynayo, dadka macaamiisha u noqonaya, dadka ka shaqaynaya, waxa uu uga duwan yahay ganacsiyadii ka horeeyay, qarashka ku baxaya iyo faa'iidada laga rajaynayo, intas oo idil markii uu cadeeyo in uu maalgelin weydiisto bangiyada dalka ku yaala oo bixiya adeegyo ay ka mid yihin mushaarakah, mudaarabah iyo muraabaxo.

Sida aan aragno waxa ugu badan oo ay adeegyada bangiyada ee maalgelineed ka shaqeeya bixiyaan waa adeega la yiraadho muraabaxo, taas oo macnaheedu yahay sheego waxa aan kuu iibinayno kadibna lacagta qeyb si hormaris ah u bixi inkastoo bangiyada qaar aysan lahayn horumariska, inta kalana muddo cayiman oo dhowr bilood ilaa iyo dhowr sano ah ah ku bixi.

Sidaas ayuuna bangiga kuugu iibinayaa badeecadii aad ku bilaabi lahayd ganacsigaaga, laakiin wax lacag cadaan ah kuma siinayo maadaama uu bangigu rabo in uu faa'iido ka sameeyo howsha uu kuu hayo intuu lacag cadaan ah ku siiyo hadana kuma dhihi karo lacag kale ii dulsaar oo waxay noqonaysaa ribo, maadaama aan umad muslim ah nahayna waa naga xaaraam ribada.

Hadaba su'aasha isweydiinta mudan ayaa ah qofka hada bilaabaya ganacsiga hadii uu bangiga u iibiyo wixii badeeco ahaa ama qalab la

taaban karo ahaa, sidee loo sii wadayaa ganacsiga illeen waxa uu u baahan yahay lacag cadaan ah oo lagu socodsiiyee.

Su'aashaas ayaa ah midda dad badan oo ka mid ah hal-abuurleyda ganacsi ay uga hareen ama uga niyad jabeen fikiradoodii iyo hamigoodii illeen ganacsatadii lacagta haysatay sida bangiyadii lacag cadaan ah ma bixinayaan, ganacsiga bilowga ahna ka maarmo lacag cadaan ah oo lagu dabaro kirada, korontada, suuqgeynta, mushaaraadka iyo adeegyada yaryar.

Waxaanse aqriste kugu bishaaraynayaa in aan kuu hayo sirta aysan dad badan oo ganacsatada ah aysan kula wadaagin, oo laga yaabo in ay maanta kugu horeyo taas oo ah inaad bangiga ka heli kartid lacag cadaan ah adiga oo aan wax ribo ah gelin, laakiin si aad u heshid lacagtaas cadaan ka ah waa inaad raacdha qodobadan soo socda:

- Soo qiimay adeega aad u baahan tahay inaad ganacsigaaga ku bilowdid tusaale waa \$5000
  - Raadi qof qaraabada ama asxaab aad tiihiin oo iibiyaa badeecad si xawaara leh ku gadmata sida quutul daruuriga, shidaalka ama qalabka dhismaha, markii aad heshidna waxad kasoo dhamaysataa in ay qiima sheeg kugu sameeyaan badeecad dhan \$5000.

- Sidoo kale waxaad ka dhamaysataa in aad u baahan tahay lacag cadaan ah oo dag dag ah sidaa darteed bangiga waxaan ka dalbanayaa in uu alaabtan iiga kiin gado oo lacag \$5000 dolar ah idin siiyo, kadibna markii uu bangiga alaabta ii gado oo aan la wareego waxa uu idin siinayaa lacagtiinii \$5000 ahayd, waxaan soo cadeynayaa alaabtii oo aan sii iibinayaa ee adinka lacagtaas aan suuqa kasoo cadeynayo iga sugta oo midda hada uu bangiga idin siiyay ee \$5000 l deymiya.
- Markaas ayaa waxaan raranayaa alaabtii oo aan geysanayaa bakhaar kale oo isla alaabtaas ka ganacsada, si aad u heshid lacagtii cadaan ka ahayd waxaad bakhaarkaan labaad ama macaamiil u baahan alaabta aad haysid u bandhigaysaa in uu alaabtaas kala wareego lacag dhan \$5000 oo dollar oo fara saar ah.

Waxa ay ku leeyihiiin suuqa dhan ayay sidaa ku taalaa ee maxay taada uga duwan tahay, waxaad tiraahdaa ku qaado \$4900 oo discount \$100 ah adiga oo fadhigaaga ka kicin ku hel, waxaa laga yaabaa in uu kaa ogolaado, sidaas ayaad alaabtii ugu wareejinaysaa asagana aad uga qaadanaysaa lacag cadan ah,

oo laga yaabo in ay ka sugayaan qoladii alaabta lagaga gaday oo lacagtoodii ku deymiyay.

Waxaa laga yaabaa in ay waqtii qaadato wareejinta alaabta laakiin waa qaabka ugu fudud ee lacag caddaann ah looga heli karo bangiyada.

- Si ribada looga badbaado alaabta bakhaarkii laga gaday isla asaga haka sii gadin oo qiima jaban haku siinin ee waa inaad gacan kale oo aan ahayn tii lagaga iibiyay aad kasii iibisaa.

Inkastoo ay u ektahay qodobo isku soo laalaabanaya hadana hadii aad si dagan u akhrisid waa wax aad u fudud, waana qaabkaas qaabka kaliya ah oo ay bulsha badan ogayn, laakiin aan rajaynayo dad badan oo ka mid ah hal-abuurleyda akhrisan doonta buugan ay ka faa'ideysan doonaan.

Ugu dambeyn waxaan ka cudur daaranayaa haddii bangiyada ay u arkaan cutubkan mid shaqdooda xad gudub ku ah, ujeedkaygu waa in umadda guud ahaan, gaar ahaana hal-abuurlayda cusub ee aan dhaqaalaha haysan dowlad ama ganacsato caawinaysana jirin in ay helaan xeelad ay wax ku bilaabaan ayaga oo aan cidna ku xad gudbin ayagana aan niyad jabin.

## ABUURO SHAQO MUSHAARI AH

Haddii aad tahay akhriste qof aysan u fududeen in uu maanta abuurto ganacsi uu asaga leeyahay, isla markaana aad tahay shaqo la'aan una baahan tahay in aad noloshaada horumariso, waxaan cutubkan uga hadli doonaa sidii aad shaqa la'aanta uga bixi lahayd.

Haddii aad tahay qof wax soo bartay oo laga yaabo in uu illaa heer jaamacadeed soo gaaray, ama aad tahay qof aan waxbaranba waxaan idinkugu bishaaraynayaa in dunida maanta meesha ay marayso qasab ahayn in uu qofka haystaa shahaado iyo cadeyn waxbrasho ee waxaa kaliya oo ugu muhiimsan ay tahay xirfadda uu qofka leeyahay, iyo in uu yahay qof maskax furan oo wixii loo sheegaa fahmaya, daacanimo iyo howlkarnimana leh.

Inta aadan shaqa raadin marka hore waxaad qiimeyn ku samaysaa naftaada adiga oo weydiinaya su'aalo ay ka mid yihin horta ma u baahanahay in aan shaqeeyo, ma ahay qof aamin ah oo daacad ah, ma ahay qof howlkar ah oo shaqadii loo dhiibaa sida ay tahay u gudan kara?

Dhamaan su'aalahaas waxa ay noqonayaan jawaabtooda HAA, waa haddii aad tahay qof doonaya in uu is badal iyo horumar gaarsiiyo noloshiisa, waayoo qofka caqligiiisu tamaam yahay oo leh damiir waxa

uu gartaa xilliga ugu haboon oo ay tahay in uu isbadal sameeyo, ee ma ahay qof asaga oo wali ku jira xaalad nololeed oo laga wanaagsan yahay, ficiis iyo dad badan oo asaga la mid ahaana ay noqdeen kuwa ka dambeeyana ay usii socdaan in ay ku talabsadaan dad isku filnaada oo dadkoodana wax taray wali iska hurda oo aan baraarugin.

Markii aad xaqijiso in aad dhinac walbo diyaar ka tahay oo isbadal dhab ah in aad sameyso go'aansato ayaad hadana waxaad is weydiisaa su'aalahan kale xirfad nooceee ah ayaan leeyahay oo maanta hadii aan soo bandhigto aysan ceeb iiga imaaneen? Maxaan u hayaa jacayl iyo rabitaan oo aan jeelaan lahaa in aan qabto? Fursad nooceee ah ayaa maanta ii muuqata oo aan ka faa'ideysan karaa, isla makaana dabooli karaa?

Markii aad ogaatid intaas waxaa kuu soo baxaysa meeshii ama shaqadii aad ku dhaqaaqi lahayd, kadibna si aad uga duwanaatid inta kale ee sidaada oo kale ah oo doonaya isbadalka isla markaana shaqada diyaarka u ah waxaad samaysaa wax aysan horey u samayn kuwa badan oo jiilkaaga ahna aysan diyaar u ahayn in ay sameeyaan, taasoo ah baadi goobka shaqadii ama fursadii aad is tustay in aad ka faa'ideysan kartid.

Inta ugu badan dhalinyarada oo isugu jira kuwa waxbartay iyo kuwa ka niyad jabay waxbarashada kadib markii ay arkeen saaxiibadii ka horeeyay oo shaqa la'aan ah waxay joogaan guryaha ama fadhiyaan darbiyada ayaga oo leh wadankaan shaqa kama jirto, cidloo shaqeeyo malahan, qabyaalad ayaa ka jirta goobaha shaqada iyo eedeymo kale oo badan.

Si aad uga duwanaatid jiilkaaga oo aad u samaysatid shaqadii aad mustaqbalka dhow ku gaari lahayd isku filnaashaha iyo horumarka aad tiigsan jirtay waligaa waxaad naftaada ka dhaadhicisaa in ay aqbasho ku shaqeynta si bilaash ah, oo aan ula jeedo in aad tagto halka ay ka jirto fursaddii aad horey usoo ogaatay in aad ka faa'ideysan kartid, adiga oo ka codsanaya in ay kuu ogolaadaan jaanis shaqo aadan wax lacag ah ku qaadaneynin, oo aad kaliya khibradaada iyo naftaadaba aad ku kobcinaysid adiga oo diyaar u ah in aad u shaqeysid sidii qof mushaari ah, sharciga laguugu dhaqo sidii qof mushaari ah, lagula xisaabtamo sidii qof mushaari ah.

Si aysan diidmo ama shaki uusan u imaana waxaad sii diyaarsataa qof waalid ah, walaal ka weyn ama saaxib laga yaqaano halka aad danaynaysid in aad ka shaqeysid, aad bay ku caawinaysaaye.

Haddii aad ku guleysan waysid tijaabadii kowaad, ha niyad jabin ee raadi mid labaad iyo mid sadaxaad ilaa aad ka heshid soo dhaweyn diiran iyo aqbalaad.

Markii aad ku guuleysatid in aad shaqa bilowdid waxaa si aad iyo aad ah ugu dadaashaa xaqijinta dhamaan shuruurcda iyo hab dhaqanka u yaala shirkadaas, adiga oo ku dadaalaya in aad tiigsatid kaalinta koowaad dhan walba.

Waxaad ku sifowdaa howlkarnimo, daacadnimo, amaano iyo ixtiraamka madaxda iyo shaqaalaha kale ee goobta kaala shaqeeya.

Sidoo kale waxaad hanataa qalbiyada macaamiisha oo aad is ku bartaa waji furnaan iyo wanaag, maxaa yeelay waa marqaati aan laguu dirsan oo hadhoow madaxdaada ayay kaaga marqaati kacayaan in aad tahay qof wanaagsan oo ay ka heleen dabeeecadiisa iyo shaqo wanaagiisa.

Muddo kooban markii aad ka shaqeynaysid goobtaas waxad helaysaa aqoontii iyo khibradii ku saabsanayd shaqadaas iyo suuqaas, sidoo kale waxad ku baranaysaa dad fara badan oo wanaag mooyee aanan wax kale kuu qabin, waana laba faa'iido oo aysan helin dadka shaqa la'aanta guryahooda iyo jardiimada fadhiya ee sugaya kaliya in ay helaan shaqo mushaar fiican leh.

Waxaad markii aad dhinac walbo ka dhisantid oo aad tiraahdid waad isku filan tahay la fadhiiso madaxda goobta adiga oo uga mahadcelinaya fursadda quruxda badan oo ay ku siiyeen isla markaana wax wayn ku kordhisay ama ka badashay noloshaada, sidoo kalana wawaad u sheegtaa in aad aqoonta aad heshay diyaar u tahay in aad ku shaqa tagtid, si aad u dabooshid baahiyahaga isla markaana qoyskaaga aad wax ku tartid.

Intaas markii aad maamulka u sheegtid waxaa xaqiqa ah in ay ka xumaanayaan tagitaankaaga, isla markaana ay u sawirmeyso culeys wayn oo aad ka haysay hadii aad tagtidna sidii aad u dabooli jirtay in ay adag tahay in loo daboolo.

Muhiimadaas wayn oo aad u leedahay shaqada aad haysay darteed waxay 90% u badan tahay in lagaa diido in lagu fasaxo oo lagu yiraahdo shaqadii aad meel kale ka raadin lahayd iyo mushaarkii aad ka heli lahaydba halkaan ayaan kaa siinaynaa ee booskaaga noo jog oo halkii kasii wad shaqa wanaagii.

Sababta aan sidaa u leeyahy akhristoow waa tijaabo aan anigana soo sameeyay, dad badan oo dhalinyaro aan aniga tababarayna ay ku guuleysteen, sidaa darteed ayaan kuugu xaqijinayaa haddii aad

noqotid hal-door ka shaqada in uusan qofna jecleen in aad ka tagtid oo cidkale ay ka faa'ideysato asaga oo waqt iyo tababar ku soo siiyay.

Dunidan maanta aynu joogno waxaan dhulka dhacaynin, shaqa la'aana noqoneen qof karti, daacadnimo iyo amaano ku sifoobaa, laakiin nasiib xumo dhalinyaradeenii waxay sugayaan in ayaga oo guryahooda jooga la yiraahdo kaalay soo shaqa gal, waxaanse maanta ka dib rajaynayaan in ay heleen sirtii ay uga bixi lahaayeen shaqa la'aanta haysa.

## GUNAANAD

Mahad idilkeed allahii na abuuray isla markaana ii suurta geliyay inaan qoro buugan ayay usugnaatay, marka xigta akhriste waxaan soo gaarnay gabagabadii buuga, waxaana aniga qoray iyo adiga akhristayba rajaynayaa in aan kawada faa'ideysanay.

Sidoo kale waxaan mahad balaaran halkan uga marinayaan dhamaan intii igala qeyb qaadatay qoridda buugan oo talo iyo tusaale iyo walibaa dhiiri gelin ila garab istaagay, waxaana idin leeyahay la'aantiin buugan iima suurta galeen in aan soo saaro.

Waxaan si guud ula hadlayaa dhamaan umadda soomaalida ah meel walbo oo ay ku nool yihii waxaana leeyahay ka kaca fadhiga oo awoodihiina garta noloshiina iyo tan umadda muslimka ah oo dhan gaarsiiya isbadal iyo horumar la taaban karo.

Si gaar ahaan waxaan ula hadlayaa dhalinyada oo aan leeyahay walaalayaal haddii adan adinku isbadalin oo aad horkicin isbadalka cid idin badaleysa malahan, ee u istaaga isbadal daacad ah oo noloshiina u horseeda halkii ay u qalantay in ay ku noolaato.

Sidoo kale waxaan idin leeyahay waxaan dib ugu kulmi doonaa buugaag kale oo sida buugan oo kale horumarinta bani-aadmiga guud ahaan gaar ahaana umaddeena ka hadlaya.

Ugu dambeyn waxaan halkaan ku xusaya laba qoraa oo aan laba cutub kasoo qaatay oo kala ah Mudane ABDIRAHMAN MOHAMED JEYLANI iyo qoraa magaciisa uusan ku qorneen laakiin maqaalkiisa aan ka soo qaatay brocafimaad.com website ka la yiraahdo, waana leeyahay mahadsanidin qoraalkiina aniga iyo akhristayaashaba waa uu na anfacay ajirna allaha idin kugu badalo aamiin.

#### MAHADSANIDIN

#### **Qoraaga:**

Mohamed Ali Yalahow

Hal-Abuure, Qoraa & Maalgashade

+252 612 868080

[mcyalah@gmail.com](mailto:mcyalah@gmail.com)